

Nasteexooyin Dhakhso ah oo ku saabsan Saacadaha dheeraadka ah iyo Xadka Shaqada Todobaadka ee loogu talagalay Daryeel bixiyayaasha Qofka

Todobaadka shaqadu waa:

- Axad saacada 12:00 a.m. (habbeen barkii) illaa Sabtida saacada 11:59 p.m.
- Todobaadka shaqada wuxuu gudbi karaa mudooyinka lacag bixinta.
- Todobaadka shaqada wuxuu gudbi karaa bilooyin.

Sunday	Monday	Tuesday	Wednesday	Thursday	Friday	Saturday	
15 July 6	16 6	17 6	18 6	19 6	20 5	21 5	40
THIS WEEK CROSSES 2 PAY PERIODS →							
22 5	23 5	24 6	25 6	26 6	27 6	28 6	40
THIS WEEK CROSSES 2 MONTHS AND 2 PAY PERIODS →							
July 29 5	30 5	31 6	Aug 1 6	2 6	3 6	4 6	40
THIS WEEK CROSSES 2 MONTHS AND 2 PAY PERIODS →							

Adigu ma qaadan doontid tallaabooyin qandaraas oo loogu talagalay in la shaqeeyo wax ka baddan xadkaaga shaqada todobaadka ee loogu talagalay:

- Tababarka DSHS ee loo baahanyahay
- Wakhtiga Safarka La oggolaaday
- Wakhtiga Maamuleed
- Lacag bixinta Waqtiga Fasaxa ah (PTO)

Sideen uga fogaan karaa tallaabooyin qandaraas?

- Had iyo jeer waqti hore u qorsheyso jadwalka shaqadaada kahor inta aan bilaabanin todobaadka shaqada kadibna qor.
- Haddii baahiyada macmiilka ay isbeddelaan oo ay tahay in aad ku shaqeeyso jadwal kale oo saameynaya xadkaaga shaqada todobaadka, si deg-deg ah ula xiriir maamulaha kiiska macamiilka.
- Ku diiwaangeli waqtigaaga shaqada xaashidaada waqtiga kadib maalin kasta ee aad shaqeeyso, waxaa sidoo kale caawimo leh in lagu diiwaangeliyo ama lagu qoro kalandaariye waraaq ah. Inta baddan fiiri si aad u hubiso in aad ku jirtid gudaha xadkaaga shaqada todobaadka.
- DSHS waxa ay leedahay xogag ku caawinaya adiga iyo qofka aad u shaqaysid/macamiilka in aad wax baddan ka ogaatiin maareynta jadwalkaaga si aad u ahaatid gudaha xadkaaga shaqada todobaadka. Xogaga waxaa laga helayaa boggaan internetka ah www.dshs.wa.gov/altsa/IPOT.

In intee le'eg ayay tallaabooyinka qandaraaska ku jiri karaan faylka qandaraaskeyga?

- Tallaabo qandaraas kasta waxay ku jiraysaa faylkaaga muddo ah 12 bilood laga bilaabo taariikhda ku qoran dusha oggaysiiska tallaabada qandaraaska. Kadib 12 bilood, tallaabada qandaraaska waa la xirayaa.

Bisha lagu sheegay tallaabooyinka qandaraaska ama warqada la helay waa bil lacag bixin:

- Haddii ay warqadu ku qorantahay "saacadaha la bixiyay bisha Abriil," saacadaha la shaqeeyay waxaa kamid noqon kara saacadaha la shaqeeyay bisha ka horaysa (Maarso).
- La xiriir maamulaha kiiska haddii aad qabtid su'aalooyin ku saabsan bisha aad ku sheegatay saacadaha dheeraadka ah.